

SOMALI VOICE OF NEW ERA PROGRAM NO 1057

THE BOOK OF AMOS 5:19-6:1

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC AND UNDER.

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."**

Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub. Waxaannu horey idiinku sii wadaynaa dhegaystayaal casharradii aynu ka soo xiganaynay kitaabkii Caamoos oo ahaa nin Ilaah farriin ugu soo dhiibay boqortooyadii woqooyi xilli ay ku baraareen hawlahooda, laakiin haddana ay Ilaah ka dheeraadeen.

Caamoos ma ahayn nin la mid ah culimadii waxbaratay ee wakhtigiisa, wuxuuse ahaa nin uu ka dhex shaqaynayo Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah. Mar uu la hadlayey Dadka reer binu Israa'iil ayaa nebigu wuxuu iyaga garansiinayaa waxa ku soo socda oo ah in magaalada la burburin doono. Wuxuuse u sii sheegayaa in dembiyadooda aawadood Ilaah

burburin doono magaalada Beytal. Wuxuuna nebigu isagoo arrinkaas ka hadlayaa uu leeyahay:

"Haddiisa magaalo buun laga dhex afuufo, miyaan dadku cabsan? Miyaa belaayo magaalo ku dhacdaa, hadaan Rabbigu saas ku samayn?" Wuxuu nebigu doonayaa inay ogaadaan haddii belaayo ku dhacdo magaalada Beytal ama Samaariya in taas looga jawaabayo fawaaxishada magaalada ka dhex socota iyo weliba in la diiday Hadalladii Ilaah.

SONG: REEL-----CUT-----

Markii noogu dambaysay dhegaystayaal waxay inoo joogtay meeriska cutubka aayadaha 14-15, markaasoo nebigu uu lahaa: **"Wanaagga doondoona, sharkase ha doondoona, aad noolaataane, oo sidaasuu Rabbiga ah Ilaaha ciidammadu idiinla jiri doonaa sidaad u tidhaahdaan. Sharka nebcaada, oo wanaagga jelaada, oo caddaaladda iridda ku sameeya....."** Intaas waa inta laga doonayo insaanka dhulka ku nool.

Waxaa jirta haddaba naxdin ay lahaanayso haddaan Rabbiga lagu wacdiyin, oo aan innaba dadka loo sheegin halaagga imanaya haddaan la dhegaysan waxa Rabbigu leeyahay. Rasuul Bawlos oo ariinkaas u faahfaahinaya dadka ayaa wuxuu leeyahay sida ku qoran Warqaddiisii labaad ee reer Korintos 5:11. Waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Sidaa daraaddeed annagoo garanayna cabsida Rabbiga, ayaannu dadka aaminsinnaa; laakiin Ilaah waannu u muuqannaa, waana rajaynaynaa inaannu qalbiyadiinna u muuqanno."

Haddaba dhegayste aan su'aal ku weyddiiyo, miyaad diyaar u tahay inaad maanta Samada aaddo ama aad

qaabisho Masiixa oo ka hor-muuqato? Miyaadse wax waliba iska habaysay? Rsuul Bawlos oo Masiixyyiintii reer korintos ayaa wuxuu leeyahay sida ku qoran Warqaddiisii kowaad ee Korintos 11:31, oo wuxuu leeyahay sidatan:

"Laakiin haddaynu innaga dhexdeenna iska xukumi lahayn, laynama xukumeen."

Sababtaas aawadeed ayey inoogu ahmiyad ballaaran tahay inaannu wax waliba u qiranno Sayid Ciise Masiix. Waxaan doonayaa in xisaabtaydu xaggiisa ku yaraato, ama aan iraahdo dembigayga. Kaba soo qaad in aad qof si been ah ugu markhaati-furtay iyo in qof kale oo Masiixi ah aad xamatay. Kaba soo qaad in markaa Sayid Ciise Masiix aad ka hor timid, miyey kula tahay inuu kuugu faraxsanaanayo oo uu garbaha kaa dharbaaxayo.

Miyuse kuugu leeyahay, isagoo ogsoon dembiyadaada aad qaridayso, war waxaad tahay nin xer ah oo wanaagsan, ninyahow barakaysan? Waxaan kuu sheegayaa in xisaab kulul aad kala kulmayso masiixa hortiiisa. Waa in wax waliba Ilaah hortii la keeno, waayo wax waliba waa in xagga Rabbiga ay ku hagaagsan yihiin oo aadan waxba qarinin.

Haddii kale waxaa imanaya maalinta aad ka hor muuqan doonto kursiga xukuumadda ee Masiixa. Caamoos, si wacan ayuu ula hadlayaa dadkiisa oo wuxuu leeyahay, kuwiinna doondoonaaya inay Ilaah la kulmaanow, yaanay idinla noqon in maalina Rabbigu ay tahay mid farxadeed, maalinta Rabbigu waxay ku bilaabanaysaa gudcur, waxaana ku dhammaanaysaa iftiin.

Haddii aad tahay qof masiixi ah, wlei waxaadka hor

muuqanaysaa Masiixa oo waxaa la eegayaa sidii shuqulladii aad jidhka ku samaysay ay ahaayeen. Balse haddaan idiinku celiyo ciqaabtu ma khusayso badbaadadaada. Waxaa la eegayaa wixii aad jidhka ku samaysay, waana lagu miisaamayaa, oo waxaad helayaa ammaan haddii wixii aad samaysay ay ammaan lahaayeen.

Haddii kale waxba heli maysid laakiin welibana lumin maysid badbaadadii aad Masiixa ka heshay. Bil-xaqiiqa shuqulkaaga ayaa loo eegayaa noloshaada, iyadoo welibana aanay saamaynaynin nabaadiinadii aad ku heshay rumaysadkii Masiixa. Miyaanay wax la yaab leh ahayn taas saaxiib? Haddaan horey idiinku sii wadno dhegaystayaal meeriska cutubka 5aad ayaannu haatan isla eegaynaa aayadda 19aad, waxaana qorniinka qoduuska ahi leeyahay sidatan hoos ku xusan:

"Waa sidii nin libaax ka cararay oo orso ka hor timid, ama intuu guri galay derbiga ku tiirsaday oo markaas abeeso gacanta ka qaniintay."

Caamoos wuxuu hadalka u kala dhigayaa ama u soo jeedinayaa sida nin waliba oo reer miyigeenna ah hadal u sarbeebo. Wuxuu isticmaalayaa maahmaa iyo suugaan sarraysa si uu ugu muujiyo kuwa ay la tahay inay Rabbiga hortiisa ku quman yihiin, laakiin dembiileyaasha ah. Masaallada uu isticmaalayana waa kuwo run ahaantii suugaantood sarrayso.

Waxay laba wejiileyaasha maalintaas u noqon doontaa sida iyadoo qodaxi ay gacanta ka mudday, oo dhiig ka yimid, oo intii ay raadsanayeen wax ay dhiigga ku joojiyaan, gadaashooda uu libaax ka

soo baxay, oo markii qofku damcay inuu libaaxa ka cararo, ayaa waxaa hortiisa ka soo baxay oorso ama weer weynaha laga helo qaaradda Yurub.

Haddaba waad mala-malayn kartaa sida ay noqonayso maalintaas. Markii uu oorsada ka soo cararay qofku ayaa ee uu daalay, oo uu xoogaa yara nastay, ayaa haddana geedkii uu taagnaa dushiisa waxaa ka soo degay abeeso ama jilbis. Markaasay la noqonaysaa in libaaxu u roonaa, waayo isla markiiba ma dhinteen haddii libaaxu qabsan lahaa.

Balse imminka haddii jilbisku qaniino, isla markiiba wuu dhimanayaa. Wuxuu nebigu adkaynayaa oo uu dadka ka dhaadhicinayaa inaanay la noqon inay Ilaah ammaan-ayaan oo weynaynayaan, oo cisaynayaan, iyagoo weliba Ilaah ku sharaf-jebinaya sida ay u nool yihiin. Markii aad masaakiinta khiyaanayso, oo wixii uu ku noolaan lahaa hal bil oo dhan kala wareegto saddex maalmood.

Waxaad qaali ka iibinaysaa raashinkii uu ku noolaan lahaa, oo gurigii uu degganaana waad ku qaaliyeysey, oo miciishaddii ayaad sare ugu qaadday. Haddii uu kuu soo dacwoodana aad dharbaaxo iyo feer ugu jawaabayso, haddana aad leedahay Ilaah baan rumaysanahay, sow Ilaah ka dhigi maysid sida inuu kelidaa Ilaah kuu yahay, balse aanu Ilaah u ahayn kan aad silcinayso.

Labada weji ee aad ku shaqaynayso, ee midna aad Ilaah naxariis iyo kheyrr kaga raadinayso, kan kalena aad ku gumaadayso walaalkaa, ayaan innaba Ilaah dhankiisa ka keenaynin jawaabo wanaagsan iyo barakada aad malaynayso. Waxayse kuu noqonaysaa

sidii nebigu hadalka u dhigay, oo Maalinta Rabbigana waxaad kala kulmaysaa argaggax.

Waxaa nebigu ku leeyahay kuwa labada weji ku shaqeeya sidatan: "Waa sidii nin libaax ka cararay oo oorso ka hor timid, ama intuu galay derbiga ku tiirsaday, oo markaas abeeso gacanta ka qaniintay." Haddaba laba wejiilayaasha sannad waliba arooska ku jira, oo haddana ay la tahay inay derajaynayaan Ilaah waxay la kulmayaan ciqaab daran oo la mid ah tan ninka libaaxa ka soo orday oo oorsadu gadaal uga timid.

Oo markii uu ka soo baxsadayna soo galay gurigiisa, oo aqalka dhexdiisa ay abeesada ama halaqu ku qaniinay. Haddaba kuwiinna masiixyiinta ah waxaad leedihiin mid aan laydinka qaadanaynin, waxaana weeye badbaadadiinna, laakiin waxaa suuragal ah inaydaan hawshii aad qabateen waxba abaal-marin ah ku helin markii la tijaabiyo. Haddaan horey idiinku sii wado meeriska cutubka 5aad ayaannu idiina khriyeynaa aayadda 20aad ee cutubka 5aad, waxaana qorniinku leeyahay sidatan: **"Maalinta Rabbiga sow ma ahaan doonto gudcur aan iftiin lahayn, iyo xataa gudcur weyn oo aan dhalaal lahayn?"**

Waxaa nebigu uu uga digayaa kuwa ay la tahay in Yoomatal xisaabka ay wanaag la kulmi doonaan, in xaalku sidaas uu ka duwanaan doono. Maalinta Rabbiga waxay ku bilaabaynaysaa xisaab, taasoo weli ay dhowrayaan reer binu Israa'iil. Haddaba waxaa jira wakhtiyo badan oo xisaab ah, waxaana Maalinta Rabbigu ay qayb ka tahay maalmaha xisaabta.

Waxaa kaloo Maalinta Rabbiga ay ka mid tahay oo lagu tiriyaa Imaanshaha labaad ee Sayid Ciise Masiix dhulka iman doono, oo ah dhammaadka boqortooyooyinka dunida, iyo Bilowga boqortooyada Masiixa. Haddaan horey idiinku sii wadn meeriska ayaannu dhegaysatyaal horey idiinku sii wadaynaa cutubka 5aad, waxaanay idiin akhriyayaa aayadaha 21-23, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"In kastoo aad ii bixisaan qurbaannadiinna aad gubtaan iyo qurbaannadiinna hadhuudhka ah aniga aqbali maayo, oo qurbaannadiinna nabaadiino oo xoolihiinna buurbuuranna dan ka yeelan maayo. Iga fogeeya qaylada gabayadiinna, waayo, anigu dhegaysan maayo luuqda shareeradihiinna."

Waxaa Ilaah ogaaday in diimadooda aanay taabanin sida ay u nool yihiin, oo waxay ay sheeganayaanna kuma dhaqmaan. Waxaa dadka Ilaah laga doonayaa inay gartaan in rumaysadkooda uu noqdo mid xor ah. Rumaysadkuna maahan inuu noqdo mid itaal daran ama mid aan waxtar lahayn. Waa in waxa aad rumaysan tahay noloshaada laga arko. Waxaad arkaysaa kuwa isku sheegaya mashaa'ikh laakiin haddana markii ay timaaddo caadifad qabiil u xaglinaya dhanka qabiilka. Waxaa la doonayaa in markii qabiilka iyo rumaysadku ay iska hor imanayaan, inaad ka doorato rumaysadka aad Ilaah ku qabto, oo aanay caadifad qabiil kula tegin.

Waa inaadan garta u qaloocin laaluush ama eex qabiil awgeed. Waa rin rumaysadkaaga la dhex arkaa shuqulladaada, oo rasuul Yacquub oo arrinkaas kala hadlaya masiixyiinta yaa wuxuu leeyahay, **"Rumaysadka aan shuqulka lahayn, waa meyd."**

Bawlosna wuxuu leeyahay, **"Waxaa laynoo badbaadiyey in noloshayada laga helo shuqullo wanaagsan, markaa waxyaabahaa ay rasuulladu inoo sheegayaan ay muhiim yihiin."**

Wakhtigii Caamoosna reer binu Israa'iil waxay ku noolaayeen nolol aan istaahilin rumaysadkooda. Haddii qofi joogi lahaa dhexdoodana waxaa u muuqna lahayd laba-wejiilenimada ay ku dhaqmayaan. Dhinac Ilaah bay kala socdaan, dhinacna waxay silcinayaan kuwii hoos joogay. Ilaahna laba wejiilenimadaas aad iyo aad buu u neceb yahay.

Waxay u tegayeen hablaha ragga ay ka xoola badan yihiin ay qabaan, oo waxay kaloo boobi jireen masaakiinta iyo kuwa ka awoodda yar. Waxay dadkii ka hor keeneen Ilaah, oo waxay dadkii bareen caabudista weyshii dahabka ahayd ee ay ka taageen markii ugu horraysay Beytal.

Waxaa loo baahan yahay haddaba markii aad qiratid inaad Ilaah jeceshahay oo aad soo raacayso Masiixiisa, in jacaylka Masiixa qalbigaaga laga arko, oo uu kaa baabi'iyo aarsiga, huqda iyo ciilka. Haddii kale afka un baad ka sheeganaysaa inaad Masiixi tahay laakiin weli waxbaa kuu laaban, haddaadan cadowgaaga cafiyin toddobaatan goor oo min toddoba ah. Weli waxaannu ku jirnaa meeriska cutubka 5aad, waxaanan idiina khriyeynaa haatan baalka 1047 ee Axdigii Hore, ktiaabkii Caamoos aayadaha 24-26, waxaana qorniinka goduuska ahi leeyahay sidatan:

"Laakiinse caddaaladdu sida biyo ha u qulqusho, oo saxqnimaduna sida webi fatahahaya ha u yaacdo. Bal reer binu Israa'iilow, allabbaryo iyo

**qurbaanno miyaad cidladii iigu bixiseen
afartankii sannadood? Waxaadse sidateen
Taambuuggii Molek iyo sanamyadii Kiyuun, kaasoo
ah xidigtii ilaahiinnii ee aad nafsaddiinna u
samaysateen."**

Bil-xaqiiqa markii ay cidlada marayeen reer binu Israa'iil oo ay Muuse la socdeen, ayey mararka qaarkood, iyadoo Muuse uusan ogayn si qarsoodi ah ilaahyadooda ay samaysteen wax ugu bixin jireen. Oo asnaamtii ay wax u bixin jireen waxaa ka mid ahaa sanamka la yiraahdo Molek oo isagu ay caabudi jireen dadkii Bariga ee karaahiyada ahaa.

Waxay sanab dab lagu gaduudiyey oo gacmihiisu fidsan yihiin saari jireen ilmaha ay dhaleen oo ay allabbari ahaan u bixinayaan. Waxaana halkaas lagu halakayn jiray carruur fara badan. Waxaa la mid ah kuwa iska dhigaya inay Ilaah caabudayaan toddobaadyada oodhan, oo markii ay fursad ka helaan kuwa aan waxba galabsan ee ay doonayaan inay dhacaan, gudcurka ka soo toogta.

Markii uu la safan yahay jameecada wuxuu iska dhigayaa nin ahlu-taqwa ah, wuxuuna qalbiga ku haystaa xumaan iyo inuu wax soo halakeeyo ama soo halaago, dabadeedna dib ugu soo noqdo jameecadiisa. Waxay la tahay in Ilaah aanu arkaynin waxa uus amaynayo. Weliba waxaa jira kuwo ka mid ah jameecada Masiixiyiinta ah wakhtiga maalinnimada iyo maalmaha Axadda.

Markiise ay ka tagaan jameedada waxay samaysanayaan waxyaabaha noloshoodu jeceshahay. Waxbay damcayaan, oo waxay donayaan inay mid kale jagadiisa khiyaamo ku qaataan, iyagoo hadallo been

ah ka sheegaya. Ilaahna wuu neceb yahay xumaanta iyo xaasadnimada banii'aadanka iyagoo weliba iska dhigaya sida inay Ilaah derajaynayaan. Haddaan soo koobno meeriska cutubka 5aad ayaannu haatanna idiin akhriyeynaa aayadda 27aad, waa baalka 1027, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

"Haddaba sidaas daraaddeed Rabbiga magiciisu yahay Ilaaha Ciidammadu wuxuu leeyahay, Anigu waxaan idinka dhigi doonaa in maxaabiisahaan laydiinku kayxaysto dimishaqa shishadeeda."

Waxaa haddaba Ilaah xugmay, sida nebigu waxyoonaayo, in Israa'iil la ciqaabi doono wakhti mustaqbalka ah. Waxaanay u gacan-geli doonaan reer Dimishaq, oo marka uu leeyahay nebigu Dimishaq shishadeeda, ama meel Suuriya ka sii shishaysa ayuu ka hadlayaa magaalada Nineveh. Waxaa Ilaah ku leeyahay reer binu Israa'iil, reer Ashuur ayaa iyaga loo gacan geli doonaa oo waxaa dalkooda looga wadan doonaa musaafuris.

MUSIC

Waxaa dhegaystayaal intaas ku soo dhammaanaya cutubkii 5aad ee kitaabkii Caamoos, oo gebigiisba looga hadlayey ciqaabta ku soo degaysa reer binu Israa'iil wakhti Mustaqbalka ah. Ilaahan sidii uu kaga hadlay afkii nebiyada ayuu sameeyey oo waxay noqotay in reer binu israa'iilkii reer woqooyiga ahaa loo kaxaysto dhulka reer Ashuur, iyo Dimishaq shishadeeda.

Waxaanan imminka si dawaali ah dhegaystayaal idiinku bilaabaynaa:

**CUTUBKA LIXAAD EE KITAABKII
NEBI CAAMOOS.**

Waxaa haddaba cutubkan lixaad uu ku bilaabanayaa maaddada ugu horraysa ee ah in:

ISRAA'IIL OO LOO CANAANANAYO SI AY XUMAATOYINKOODA UGA TAGAAN AMA LEEEXDAAN

Marka ay sidan tahay nebi Caamoos wuxuu ku bilaabayaa cutubkan farriin hoog iyo halaag xambaarsan oo waxaa farriinta halku-dheggeedu noqonaysaa: **"Waxaa iska hoogay."** Haddaba isagu maahan nebi farriimihiisu ay ku badan yihiin weedha ah **"Waxaa iska hoogay,"** isla sida nebiyada kale ee kitaabka Axdigii hore iyo weliba kitaabka Axdiga Cusub.

Kitaabka Muujintii ayaa waxaa isna uu ka hadlayaa hoogga dadka ku imanaya wakhtiga ugu dambaynta, oo laga waayi maayo farriin la mid ah tan nebi Caamoos, markaasoo uu leeyahay: **"Waxaa iska hoogay."** Haddaan horey idiinku sii wado haddaba dhegaystayaal meeriska ayaannu haatan idiin marinaynaa aayadda kowad ee cutubka 6aad, baalka 1047 ee Axdigii Hore, waxaana qorniinka qoduuska ahi leeyahay sidatan:

"Waxaa iska hoogay kuwa Siyoon xasilloonaan ku nool, oo buurta Samaariya ammaan ku deggan, kuwaasoo ah kuwa caanka ah ee madaxda quruumaha oo dadka Israa'iil u yimaadaan."

Siyoon, dabcan waxay ka mid tahay boqortooyada koonfureed ee reer Yahuudah, markaana labada qaybood ee qaranku ka kooban yahay ayaa imminka lala hadlayaa, waana reer Yahuudah iyo reer Binu Israa'iil oo ay hormood u yihiin reer Efraayim.

Siyoon waxay xarun u ahayd diimaha, oo waxaa halkaas ka dhisnaa macbudkii weynaa ee

Yeruusaalem, Samaariyana waxay ahayd magaalo dhaqammo badan oo ay joogaan qoomiyado badan, oo waxaa ka talinaysay halkaas boqortooyo xoog weyn. Waxaana nebigu haatan leeyahay: **"Waxaa iska hoogay kuwa Siyoon xasilloaan ku nool."**

Waxaa dadku isku yiraahdaa, **"Maalin wanaagsan, ama Cawaysin wanaagsan, amase waxaas iyo waxaas dhib ha u arag,"** iyadoo weliba aannaan qofk u rajaynaynin cawaysin wanaagsan ama maalin wanaagsan. Markaa Israa'iilna sidaas ayey isku oran jireen, oo wax waliba si fudud bay u qaadan jireen, oo waxaa hadalkooda ku badnaa, Waxaas iyo waxaad dhib iyo shiddo ma leh. Welibana dadkii xumaan bay gelayaan maalin iyo habeen, oo waxaa Ilaah leeyahay, **"Waxaa iska hoogay kuwa xasiloonaanta ku fadhiya Siyoon ama Yeruusaalem."** Waxay haddaba kuwaasu haysteen hodantinnimo wakhti dhulku barwaaqaysnaa. Quruun waliba ee dunida ku nool markii ay barwaaqo haystaan dhanka Ilaah ma xusuustaan, Soomaalidaba ha ugu horraysee.

Markii roobku do'o, oo xooluhu cayilaan, oo dhulku aaran noqdo, waa marka caanaha ciirta ah bannaanka lagu daadiyo e, waxay bilaabayaan inay ciyaar qabsadaan, oo sacab iyo mashxaradi ay meel waliba ka yeerto. Raggu dhallinyarada ahi waxay raadsanayaan hablo ay guursadaan, kuwa odayaasha ahna waxay doondoonanayaan naag labaad ama gorroob ha ahaato ama mid gabarnimadi ku weynaatay ha ahaatee. Nin Ilaah dhankiisa ka hadlaya arki maysid wakhtigaas oo kale.

Waxaad meel fog ka maqlaysaa sacab iyo jaanta oo

is-qabsatay, oo markii aad soo dhowaato waxaad maqlaysaa iyaga oo leh: **"Cadday ka yar Ceebla daba-kuruseey, Hooy, Hooy, Cawada ka gadaal cayaar ma lahee, Hooy, Hooy,"** Ama iyagoo leh, haddaad reer Banaadir tahay, **"Gabley shimbir ii Gariiraa isgaadaaya."** Haddii aad reer Itoobiya tahayna waxaad maqlaysaa iyagoo leh:

"Dhar-cad oon Xiraniyo, dhaccliyo boqor iyo dhaantada dhaqan baan u lahayne Hallale." Reer woqooyiguna waxay yiraahdaan: **"Hoobeeya, Hoobeeya Hoobeyooy, Heeri Maahee, Hanna Haaban, Nimaan hellaa ma Habbooneee hanna Haaban."** Habeenka xiga ayaannu meeriska cutubka halkii idiinka wadi doonaa, balse waan garannay baan filayaa in marka xoolohu tarmaan wakhtiguna wanaagsan yahay inaan Ilaah la xusuusan.

Markaa ha la yaabin Israa'iil, waayo iyaga keliya maahan kuwa Ilaah illooba markii jeebku buuxo, oo yaanay kula noqon inaad ka qoduusan tahay ama ka duwan tahay dadnimo ahaan. Innaga qudheenna waxaa inagu badan qalooca, iyo fallaagannimda iyo amar diidada. Haddii warkayaga aadan rumaysnayn, bal booqasho ku tag garoonka Dayniile, oo waxaad eegtaa sida qaadka loo kala iibsanayo iyo ujeeddada loo cunayo.

SONG: REEL---CUT----

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamijkan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka

dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin